# Way qurux badan tahay, inaad halkaan joogto!

SOMALI

Buug ku saabsan adeegyada carruurta iyo dhalinyarada ee loogu talagalay carruurta iyo waalidiinta qaxootiga ah



Luisa Gebauer

Anna Laura Jacobi



Qoyska Yuusuf waxaa lagu qasbay inay ka cararaan gurigoodii iyo waddankoodii labadaba. Aad bay khatar noogu tahay halkan, ayuu yidhi Aabbe. Waa inaan hadda baxnaa. Waa inaan baxnaa."

Waxay soo mareen jid dheer. Mararka qaarkood waxay ku qasbanaadeen inay soo lugeeyaan masaafo dheer. Xaaladaha qaarkood waxay ku khasbanaadeen inay saacado badan soo saarnaadaan gaari xamuul ah oo dad badan ay la socdeen. Waxaa jiray dad aad u fara badan. Taasi waa sababta ay u ahayd mid ciriiri ah oo cakiran; Yuusuf aad buu u baqay. Mararka qaar ma aysan heleyn cunto ku filan oo ay cunaan, mararka qaarna waxa ay seexan jireen meelo qabow oo cabsi badan. Markii Yuusuf uu ka fikiro safarka dheer, waxa uu caloosha ka dareemaa dareen yaab leh. Hadda qoyska Yuusuf waxa ay ku nool yihiin Jarmalka, hoy loogu talagalay qaxootiga.



Youssef, hooyada, aabbaha iyo mataanaha yaryar Mo iyo Bo waxay ku nool yihiin qol yar. Waxaa jira dad badan oo ku nool hoyga. Waxay ku nool yihiin, hurdaan oo ay sidoo kale wax ku cunaan meel yar. Inta badan waxaa jira muran. Xitaa dadka waaweyni way murmaan, mararka qaarkood habeenkii – markaasna qofna ma seexan karo.

Cimilada, luqadda, iyo tan ugu muhiimsan cuntada, dhammaantood aad bay uga duwan yihiin sidii aad hore u baran jirtay. Marka la joogo xarunta hoyga, qof kastaa had iyo jeer wuxuu cunaa cunto isku mid ah. Yuusuf halkan kuma helo. Wuxuu u xiisay cuntooyinkii ay Hooyo u karin jirtay.

Youssef walaalkiis ka yar Mo mar walba wuu ooyaa. Oo markuu Mo ooyo, Bo sidoo kale wuu ooyaa isagana. Waxaa laga yaabaa in mataanaha aysan sidoo kale iyaguna ka helin halkan, Youssef sidaas ayuu aaminsan yahay. Maalmaha qaar aad bay u ooyaan ilaa wakhti dheer xitaa hooyo ayaa la oysa iyaga. Dabadeedna aabbe ayaa wada aamusiya, Yuusufna wuxuu mar kale calooshiisa ka dareemaa dareenkii cajiibka ahaa.

Laakiin waxa ugu xun ee Yuusuf la kulmayo waa caajiska. Marmarka qaar oo keliya ayaa macalin ugu yimaada hoyga si uu Luuqadda Jarmalka u baro carruurta. Laakin ilmo kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dugsi aado! Yuusuf wuxuu ogyahay midaas wuxuuna u xiisey dugsiga. Wuxuu rabaa inuu wax barto oo uu kubbadda la ciyaaro carruurta kale ee jooga goobta ciyaarta. Laakiin markaad joogto Jarmalka, waa inaad wax walba sugtaa. Dadka waaweyni waxay had iyo jeer sugaan waraaqo iyo ballamo. Yuusuf waxa uu sugayaa dugsiga. Laakiin qofna ma sheegi karo ilaa inta sugidda caajiska leh ay socon doonto.

Aïssatou waxay sidoo kale hoyga kula nooshahay hoyadeed iyo walaasheed Binta. Mararka qaarkood Yuusuf wuxuu u tagaa iyada si uu ula ciyaaro marmar. Maanta, sidoo kale, Yuusuf ayaa soo garaacay albaabkeeda. Aïssatou waxay furtay albaalba wayna salaantay: “Hello, Yuusuf.” Laakin markaas ayay tiri: “Maanta ma hayo wakhti aan kugula ciyaaro. Waxaan u socnaa xarunta qoyska.” Way dhoola cadeynaysay sababtoo ah way rabtay inay aado meeshaas.

“Xaggee i dhahday?” ayaa waydiiyay Yuusuf.

“Xarunta qoyska,” Aïssatou ayaa sharraxday. “Galabta, naadiga carruurtu waxay halkaas ku leeyihiin munaasabad. Waa meel aad u fiican oo lagu ciyaaro laguna sameeyo farshaxan. Waxa kale oo ku yaala beer leh geedo la fuulo oo aad u wanaagsan. Ma doonaysaa inaad timaaddo?” way waydiisay.

Yuusuf aad buu u farxay. Haa, runtii wuxuu rabay inuu la aado. Markaa Aïssatou iyo Youssef waxay u tageen waalidkiis si ay u weydiistaan fasax. Aïssatou hooyadeed iyo Binta ayaa hore u raacay.





Mataanaha ayaa mar kale aad u ooyay. Hooyada iyo aabaha xitaa ma maqlin waxa Yuusuf sheegayay. Markii uu ugu dambeyntii ay u suurtagashay in uu sharaxo in uu rabo in uu Aïssatou la aado xarunta qoyska, Aabuhu wuu ruxay madaxa. "Maya, Yuusuf, ma wanaagsana."

Youssef wuxuu horeyba uga walwalsanaa in Aabbaha uusan soo dhoweyn doonin fikradda. Tan iyo markii ay Jarmalka joogeen, Aabbaha aad buu u taxaddarayay. Sababtuna waxaa laga yaabaa inay tahay maadaama ay wax walba ku cusub yihiin isaga, sidoo kale, Youssef sidaas ayuu aaminsan yahay.
"Waxaa sidoo kale halkaas jooga caruur kale oo badan iyo Mrs. Schmidt," ayay tiri Aïssatou. "Aad bay saaxiibbo carruurta ula tahay, wayna nala ciyaartaa. Fadlan, Yuusuf ma na raaci karaa? Waanu ka taxadiri doonaa isaga."

"Maya, ma wanaagsana," ayuu ku jawaabay Aabbaha.

"Sidoo kale waxaa meeshaas ku yaal kafateeri loogu talagalay waalidiinta iyo kooxda socod baradka ah. Waxaan hubaa in mataanaha ay meeshaas ka heli doonaan," Aïssatou hooyadeed ayaa sharraxday. "Maa idinkana na soo raacdaan?"

"Maya, ma wanaagsana," Aabbaha ayaa mar kale sidaas yiri.

Hooyada ayaa fikir gashay. "Laakiin taasi waxay u muuqataa fikrad wanaagsan, waan tagi karnaa oo aan soo fiirin karnaa."

"Hmm, ma garanayo," Aabaha ayaa sidaas ku gunuunacay.

"Waxay ila tahay inaan dhammaanteen halkaas aadno," hooyada ayaa si dhiirri-gelin leh u tiri sidaas.



Markaasay dhammaantood u ambabaxeen xarunta qoyska.

“Hello Aïssatou, yaa kula yimid?” naag ayaa albaabka ku soo dhawaysay.

“Hello Mrs. Schmidt, kani waa Youssef. Wuxuu jeclaan lahaa inuu la kulmo naadiga carruurta.”

“Soo dhawoow, Yuusuf. Waan ku faraxsanahay inaad halkan timaadeen!” ayay tiri Mrs. Schmidt “Waan arkaa inaad sidoo kale soo kaxeyseen hooyo, aabbe iyo walaalahaaga. Waxaan ahay Mrs. Schmidt. Ma doonaysaa inaad aragto xarunta qoyska?





“Xarunta qoysku waa meel loogu talagalay carruurta iyo waalidiinta,” waxaa sidaas sharaxday Mrs. Schmidt. “Dadka aqoon u leh waxbarashada, cilmi-nafsiga, iyo shaqada bulshada ayaa halkan ka shaqeeya, aniga oo kale. Taasi waa xirfadeena. Waxaan la ciyaarnaa oo aan jimicsi la sameynaa carruurta iyo dhalinyarada. Waanu dhageysanayaa oo talo ayaanu siinaa marka qof welwel qabo. Mararka qaarkood waxaan ka caawinnaa shaqada dugsiga ama si wada jir ah ayaynu wax u karinaa ama dubnaa. Waxaan qayb ka nahay nidaamka daryeelka carruurta iyo dhallinyarada ee Jarmalka.”

“Markaa waa meel loogu talagalay miyaa qoysaska u baahan caawimaad?” waxaa sidaas waydiiyay aabbaha.

“Maya, waa meel loogu talagalay **dhamaan** carruurta iyo waalidiinta. Dabcan, sidoo kale waxaa loogu talagalay qoysaska raadinaya caawimaad,” ayay tiri Mrs. Schmidt.

“Laakin dadka intooda badan waxay u yimaadaan adeegyada wanaagsan ee aan siino carruurta iyo dhalinyarada. Adeegyadu waa lacag la'aan.”

“Haddaba markaasi halkaan ma guri loogu talagalay baa dadka masaakiinta ah?” aabaha ayaa rabay inuu arrintaas ogaado.

“Maya, waa guri loogu talagalay qof walba,” ayay tiri Ms. Schmidt. “Jarmalka, guryahan oo kale ayaa ku yaal magaalooyinka intooda badan. Adeegyada carruurta iyo dhallinyaradu waxaa lagu caawiyaa carruurta iyo dhallinyaradu si ay markaa si fiican ugu koraan oo ay ugu sii qabaan caafimaad. Dhammaan qoysaska – haddii ay yihiin hodan ama faqiir – waxay ka faa'iideysan karaan adeegyadooda. Qaar ka mid ah adeegyadaas ayaa laga helaa halkan oo ah xarunta qoyska …”



“Kooxda carruurtu waxay maanta ku kulmayaan beerta,” ayay tiri Ms. Schmidt.

“Goobteena kama jirin naadiga carruurta,” Youssef ayaa sidaas yiri. “Waxaan la ciyaari jiray ilmaadeeraday. Eediyaashay/habaryeradey iyo awoowyaashay ayaa iyaguna halkaas joogay.”

“Jarmalka, waxa ku nool carruur badan oo ilma adeeradooda, abtiyaashooda, adeeradooda, eedooyinkooda iyo awoowyaashooda ay ku nool yihiin meel aad u fog. Markaa maaha inay keligood ciyaaraan, waxaa jira adeeg furan sida naadiga caruurteena. Carruurta da'doodu tahay lix jir waxay aadaan dugsiga xannaanada, carruurta gaaray da'da dugsigana waxay leeyihiin xarun xannaano oo ay aadaana dugsiga kadib. Kaliya waa inaad isdiiwaangelisaa,” ayay tiri Ms. Schmidt.

“Tani waa xaruntayada la-talinta waalidiinta iyo qoyska. Haddii hooyo ama aabbe ay welwel qabaan, halkan ayay talo ka heli karaan,” ayay tiri Ms. Schmidt.

“Waxaan soddohday kala hadli jiray wax ku saabsan barbaarinta,” hooyada Youssef ayaa sidaas tiri.

“Halkan, dadka khibrad leh ayaa dhegaysta waalidiinta, haddii ay jiraan dhibaatooyin, waxay kala shaqeeyaan si ay xal ugu helaan,” ayay tiri Ms. Schmidt. “Qof walba ballan ayuu ka qabsan karaa. Dabcan, wada-hadalladu waa kuwo qarsoodi ah oo lacag la'aan ah, haddii aad rabto, qarsoodinimo.”



"Halkan waxaad ku arki kartaa kooxda carruurta ee socod baradka ah," ayay tiri Ms. Schmidt. "Halkani waa meesha ay ku kulmaan waalidiinta, dhallaanka iyo socod baradka. Saaxiibadey ee aan wada shaqeyno ayaa kormeerta kooxda. Waxay hooyooyinka iyo aabayaasha siisaa talooyin ku saabsan sidii ay ula ciyaari lahaayeen ilmahooda, u dhiirigelin lahaayeen una daryeeli lahaayeen."

"Halkan kafateeriyada, hooyooyinka iyo aabayaashu waxay ku cabbi karaan qaxwo ama shaah waxayna la kulmi karaan waalidiin kale. Mararka qaarkood habeennada kala qaadashaada macluumaadka ee ku saabsan mawduucyada qoyska iyo barbaarinta carryyrta ayaa halkan lagu qabtaa. Intaas ka sokowna, doolshooyinka ay samayso Mrs. Öztürk aad bay u dhadhan macaan yihiin."

"Helo!" ayay tiri Mrs. Öztürk. "Sidoo kale waad ii iman kartaa haddii aad wax uga baahan tahay dukaanka dharka. Waxaan meeshaas ku haynaa dhar carruureed iyo alaab ay ku ciyaaraan."





“Kaasi waa yabooh loogu talagalay dhalinyarada. Halkan waxa loogu caawiyaa su'aalaha iyo mawduucyada muhiimka u ah iyaga. Tusaale ahaan, marka ay timaado la-tacaalida dareenada sida xanaaqa, carrada ama cabsida, ama su'aalaha ku saabsan korriinka. Adeegan waxaa loo yaqaanaa “shaqada kooxda bulshada”. Iyadoo la isticmaalayo adeegaas, Jugendamt waxa uu rabaa in uu ku caawiyo dadka da'da yar ee ku jira xaaladaha adag,” ayay tiri Ms. Schmidt.

“Jugendamt?” ayaa yiri aabbaha isagoo yaaban, oo argagaxsan. “Waxaan maqlay sheekooyin badan oo ku saabsan Jugendamt! Waxay farageliyaan koriismada carruurta waxayna waalidiinta ka kaxaystaan carruurtooda!” Aabbaha ayaa sidaas ku canaantay.

“Maya, qofna looma ogola inuu ilmo ka soo kaxeeyo qoyskiisa,” ayay si naxariis leh ugu sharraxday Mrs. Schmidt. “Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay la noolaadaan waalidkood, waalidkuna waxay xaq u leeyihiin inay carruurtooda koriyaan oo ay masruufaan. Taasi waxay ku jirtaa dastuurka, waana sharciga Jarmalka ugu muhiimsan. Laakiin mararka qaarkood khatar aad u daran ayaa u soo if-baxda ilmaha. Mararka qaarkood waalidiintu ma ilaalin karaan ilmahooda, mararka qaarkoodna xitaa Jugendamt ma caawin karaan. Kaliya xaaladahaas ayaa ficil noocaas ah lagu dhaqaaqi karaa. Arrintaas marnaba si fudud looma go'aamin doono. Maxkamaddu waa inay dib u eegis ku sameeysaa go'aankaas oo ay xaqiijisaa. Inta badan, si kastaba ha ahaatee, Jugendamt ayaa caawin kara waalidka xilli hore haddii cunug uu khatar ku jiro,” ayay tiri Ms. Schmidt. “Markaa uma baahan doonaan inay gaaraan go'aan noocaas oo kale ah. Jugendamt wuxuu u dhisan yahay inuu garab istaago qoysaska – xitaa marka ay khatar ku jiraan.”



“Mhm, ma garanayo,” Aabbaha ayaa isagoo shakisan gunuunacaya.



“Ma aadi karnaa ciyaarta?” ayaa Aïssatou u weyddiiyey si aan dulqaad lahayn. “Waxaan rabaa inaan Yuusuf soo tuso geedka la fuulaya!”

Aabbaha wali wuxuu u muuqdaa mid shaki qaba. Hadda qof waliba si hamuun leh ayuu u eegayaa. “Mhm,” wuu gunuunacayaa. “Hagaag. Laakin ka digtoonow fuulitaanka,” ayuu yiri.

“Yay!” Yuusuf aad buu u faraxsan yahay. Aïssatou ayaa gacanta ku qabtay, oo waxay u carareen beerta.





Geedka la fuulo waa mid wanaagsan. Youssef xitaa wuxuu gaaray meesha ugu sareysa ee geedka. Halkaas kore, wuxuu ka arki karaa hooyadiisa iyo mataanaha. Wuxuu sidoo kale arki karaa aabbe. Maqaaxida ayuu fadhiyaa oo xabbad keeg ah ayuu cunayaa. Miyuu dhoola cadeynayaa?

"Soo deg, Yuusuf. Waxaan rabnaa inaan ciyaarno kubbadda cagta!" Aïssatou ayaa sidaas ku dhahday.

Sidaasna waxay maalin wanaagsan ku qaataan xarunta qoyska.



Ilaa maalintaas, Youssef, hooyada, aabaha iyo mataanaha waxay si joogto ah u imanayeen xarunta qoyska.

Xarunta la-talinta waalidnimada iyo qoyska ayaa hooyada iyo aabaha siiyey talooyin ku saabsan sidii ay mataanaha uga caawin lahaayeen inay dejiyaan. Way shaqeysaa! Mo iyo Bo aad uma ooyaan, hooyona ma ooyso.

Aabbe hadda sidii hore uma shaki badna, mana aamusnaan badna. Mar uu xitaa la hadlay shaqaale bulsho oo ka socday Jugendamt. Waxa uu ka caawin doonaa in uu helo meelo lagu xanaaneeyo Mo iyo Bo. Waxa uu sidoo kale sharaxay sida qoysku u heli doonaan caawimaad xagga helitaanka guri ah marka ay ka guuraan hoyga qaxootiga.

Laakiin qaybta ugu fiican ayaa ah in Youssef uusan marnaba caajisnayn. Naadiga carruurta, Aïssatou iyo isagu waxay samaysteen saaxiibo aad ugu fiican oo ay kubbadda la ciyaaraan. Yuusufna dareenkii cajiibka ahaan kama dareemo calooshiisa marar badan.

Waalidiinta qaaliga ah,

Yuusuf iyo qoyskiisu waxay ku cusub yihiin Jarmalka waxayna hadda baranayaan **Adeegyada Taageerooyinka Carruurta iyo** Dhallinyarada. Hay'adda daryeelka carruurta iyo dhallinyaradu waa qayb ka mid ah nidaamka bulsho ee Jarmalka. Waxaa loogu talagalay dhammaan qoysaska – iyada oo aan loo eegin asalkooda iyo luuqadda ay ku hadlaan. Hadafkeedu waa in laga caawiyo carruurta iyo dhalinyarada inay si fiican oo caafimaad leh u koraan.
Xarunta xannaanada carruurta (Kita) waa adeegga ugu caansan ee dhammaan carruurta Jarmalka jooga ay isticmaalaan. Laakiin waxaa jira waxyaabo kale oo badan, sida Yuusuf iyo qoyskiisa ay ogaadeen. Buugani waxa uu ujeedadiisu tahay in uu kugu wargeliyo waxyaabahaas oo uu kugu dhiirigaliyo in aad naftaada raadiso oo aad soo ogaato adeegyada daryeelka carruurta iyo dhalinyarada.

Waxaan rajeyneynaa inaad ku raaxaysato akhrinta buugga!



**Adeegyada iyo ereyada muhiimka ah ee adeegyada carruurta iyo dhalinyarada:**

**Xafiiska Adeegyada Dhalinyarada (Jugendamt)**
Magaalo kasta iyo degmo kasta (miyiga) waxay leedahay **Jugendamt**. Jugendamt waxay qabtaan hawlo badan oo kala duwan: Waxay xaqiijiyaan in magaaladoodu tahay mid carruurta iyo qoyska u saaxiib ah. Taas macnaheedu waa, tusaale ahaan, in ay jiraan garoomo ku filan oo ay ku ciyaaraan iyo in siyaasiyiintu ay gaaraan go'aanno u wanaagsan qoysaska. Jugendamt waxay xaqiijiyaan in xarumaha daryeelka caruurta iyo dhalinyaradu ay qabtaan shaqo fiican. Shaqaalaha arrimaha bulshadu waxay sidoo kale ka shaqeeyaan Jugendamt. Shaqadoodu waa inay taageeraan carruurta, dhalinyarada iyo waalidiinta doonaya talo ama caawimaad. Oo haddii ilmuhu khatar ku jiro, waxay la shaqeeyaan waalidiinta si ay u wanaajiyaan xaaladda una ilaaliyaan ilmaha.

**Xarumaha xannaanada iyo xarumaha daryeelka ee maalinlaha ah (Kita)** waa goobo waxbarasho iyo daryeel oo ay carruurtu dhigtaan ilaa ay dugsi ka bilaabayaan. Gudaha Kita, caruurtu waxay la yimaadaan asxaabtooda, waxaa taageera macalimiin waxayna ku kori karaan jawi dhiirigelin leh oo waafaqsan danahooda. Ka soo xaadirista xarunta xannaanada carruurta ayaa muhiim u ah dhammaan carruurta. Carruurta u barata luuqadda Jarmalku sidii luqad labaad ahaan aad bay uga faa'iidayaan barnaamijka bilawga hore. Jarmalka, ilmo kasta oo ka weyn hal sano wuxuu xaq u leeyahay inuu boos ka helo Kita. Magaalooyinka qaarkood ma heli karaan boosas ku filan dhammaan carruurta, markaa **xarumaha xannaano-maalmeedka (Kindertagespflege)** ayaa noqon karaan bedel fiican. Halkan, qof daryeela ilmaha ayaa daryeela ilaa shan carruur ah. Jugendamt waxay ka caawiyaan raadinta goob daryeel.

**Barnaamijyada dugsiga kadib ah (ee Iskuulka/Carruurta)** waa barnaamijyo daryeel (oo galabtii ah) oo loogu talagalay carruurta ilaa 14 sano jirka ah. Halkan, carruurtu waxay ka helaan qado iyo caawimaad xagga shaqada dugsiga ah, waxay ka qaybqaataan waxqabadyada madadaalada, waxayna helaan kormeer waxbarasho. Badanaa, dugsiyadu waxay leeyihiin xarun daryeel oo u gaar ah oo la aado dugsiga kadib. Jugendamt ayaa sidoo kale ku siin kara taageero xagga boos ka helitaanka xarunta xanaanada ee dugsiga kadib ah.

**Xarumaha qoyska** waa xarumo halkaas oo dhowr Adeegyo oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada lagu bixiyo. Waxay noqon karaan meel wanaagsan oo jiheyn/tilmaamo lagu siin karo dadka cusub ee imaanaya magaalo iyo xaafad cusub.

**Xarumaha waxbarashada qoyska** waxay bixiyaan koorsooyin ku saabsan nolosha qoyska, caafimaadka, iyo madadaalada. Dadka waaweyn, waxaa ay ka heli karaan mowduucyo ay ka mid yihiin iskaashiga iyo barbaarinta carruurta. Mararka qaarkood waxaa jira adeegyo kale, sida koorsooyinka luuqadda jarmalka ama tolida dharka. Koorasyooyinka intooda badan ayaa loogu talagalay waalidiinta iyo carruurta si wadajir ah, tusaale ahaan u riixriixista ilmaha, fasalada dhalmada kadib ah iyo koorsooyinka waalidka iyo carruurta isla qaataan. Carruurta, waxaa badanaa jiro adeegyo sida barashada muusiga hore, farsamada gacanta ama jimicsiga.

**Adeegyada furan ee hay'adda adeegyada carruurta iyo dhalinyarada** waxa lagaga qayb qaadan karaa isdiiwaangelin la'aan iyo lacag la'aan. Tusaale ahaan, waxaa jira naadiyada carruurta iyo dhalinyarada, garoomo madadaalo leh oo ay joogaan kormeer bulsho-waxbarasho, shirarka waalidiinta ama kooxaha socod baradka ah ee carruurta yaryar iyo waalidkood. Xarumo bulsheed oo badan (dhalinyaro, qoyska, xaafadaha ama xarumaha degmada) ayaa bixiya adeegyo furan.

**Nashaadyada wakhtiga firaaqada iyo nasashada** waxay carruurta iyo dhalinyarada siiyaan fursado ay uga qeybqaataan hawlo hal abuur leh, isboorti ama hawlo dhaqameed iyaga iyo saaxiibadood inta lagu jiro xilliga fasaxa. Si barbaarin leh ayaa loo kormeeraa. Adeegyada waxaa bixiya xarumaha adeegyada carruurta iyo dhalinyarada. Jugendamt waxay kaa caawin karaan helitaanka adeegga saxda ah ee xilliga fasaxyada. Haddii loo baahdo, waxaa sidoo kale jira suurtagalnimada ah inaad hesho taageero maaliyadeed.

**Kaalmooyinka xagga korinta ah** waxaa loogu talagalay in lagu taageero qoysaska la kulma caqabado gaar ah, si ay carruurtu u wanaag iyo caafimaad ugu koraan inkasta oo ay jiraan xaalado adag.

Waxyaabaha lagala kulmo magangalya-doonimada, dhex imaanshiyaha bulsho cusub, iyo xaddidaadda magangalyada nidaamka magalyo-doonimada iyo soo dhawayntu waxay sidoo kale qoysaska gelin karaan walaac weyn.

Caawimaadaha la xiriira barbaarinta waxaa ka mid ah:

· La-talin **xagga waalidnimada iyo qoyska ah** ayaa waxaa qaadan kara dhammaan waalidiinta – sidoo kale loo baahdana waxay ku qaadan karaan qarsoodi –. Xarumaha la-talinta xagga waxbarashada iyo qoyska waxaa laga heli karaa Jugendamt, xarumaha qoyska iyo xarumaha degmada. Su'aalaha ku saabsan waxbarashada iyo nolosha qoyska ka sokow, waalidiintu waxay sidoo kale halkaan kaga hadli karaan arrimaha la xiriira guurka ama lammaanaha.

· Caawiyaha **Qoyska ee Barashada Bulshada (SPFH)** waa shaqaale khibrad leh oo si joogto ah u booqda qoyska si uu waalidiinta uga taageero arrimo gaar ah.

· Shaqaalaha **Taageerada xagga Waxbarashada** / ama **daryeele** la shaqeeya cunuga ama qofka dhalinyerada ah si joogto ah si ay u bixiyaan taageero xagga arrimaha horumarinta shakhsiyeed ah marka ay dhibaatooyin ka jiraan nolol maalmeedka, dugsiga, ama guriga.

SPFH ama shaqaale ka shaqeeya taageerada waxbarashada ayaa waxaa u xilsaara Jugendamt. Waalidiintu waxay la xiriiri karaan Jugendamt haddii ay rabaan inay codsadaan taageeradaas. Mararka qaarkood, haddii Jugendamt uu haysto sabab uu ku rumaysto in caawimaad loo baahan yahay, iyaga ayaaba la xiriira qoyska waxayna isla gaaraan go'aan ku aadan haddii caawimaad loo baahan yahay iyo caawimada ku habboon qoyska.

**Adeegyada kale ee daryeelka carruurta iyo qoysaska:**

Haweenka **uurka leh, dhallaanka, socod baradka** ilaa saddex sano jirka ah iyo waalidkood, waxaa jira adeegyo caafimaad oo waxtar leh oo isku mid ah: Fasalada u diyaargarowga dhalmada iyo fasallada dhalmada kadib ah ee loogu talagalay haweenka, fasallada barbaarinta ee loogu talagalay hooyooyinka iyo aabbayaasha da'da yar, iyo adeegyada la-talinta ee la xiriira daryeelka iyo korriinka dhallaanka iyo carruurta yaryar. (Qoyska) umulisooyinka, adeegyada bulshada ee isbitaallada, xarumaha waxbarashada qoyska, xarumaha la-talinta ee Jugendamt ayaa ah meelaha la xiriiro si looga helo caawimaad hore.

**Way fiicantahay in la ogaado**: Wadanka Jarmalka, waxaa ka jira **baaritaano** xilli hore laga qaado carruurta ilaa 6 sano jirka ah. Baaritaannadan (U1-U9) waxa sameeya dhakhtarka carruurta oo ma eegaya caafimaadka ilmaha oo keliya, laakiin sidoo kale waxay eegayaan xaaladda korriinka maskaxeed iyo jireed ee ilmaha. Tani waxay muhiim u tahay in goor hore la ogaado in ilmuhu u baahan yahay taageero gaar ah iyo in kale. Gobolada federaalka intooda badan, waalidiintu waxay helaan casuumaad. Si kastaba ha ahaatee, waxaad sidoo kale macluumaad ka heli kartaa dhakhtarkaaga carruurta ama umulisadaada. Baaritaanada U1 ilaa U9 waxaa ku xiga U10 iyo U11 iyo baaritaanada caafimaadka dhalinyarada ee J1 iyo J2. "Buug-yaraha Jaallaha ah" ayaa macluumaad ka bixiya imtixaannada U.



Daabacayaashu waxay jeclaan lahaayeen inay u mahadceliyaan Stefan Zawar-Schlegel, madaxa Adeegga Guud ee Bulshada magaalada Trier, iyo Dr. Johanna Graf, daaweeyaha cilmi-nafsiga ee carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn, talooyinkooda fikradeed iyo xirfadeed ee ku jira halkaan.

Buuggan sawirka iyo akhrinta ah waxa lagu daabacay luuqadaha Albaanian, Carabi, Daari, Jarmal, Ingiriis, Faransiis, Ruush, Soomaali, Tigrinya iyo Turki.

DAABACAAD

| | |
|---|---|
| **Daabacaha** | Save the Children Deutschland e.V.<br>Seesener Straße 10-13<br>10709 Berlin<br><br>Plan International Deutschland e.V.<br>Bramfelder Str. 70<br>22305 Hamburg |
| **Fikradda iyo kaqeybqaadashada** | Luisa Gebauer<br>Dr. Johanna Graf<br>Dr. Stefanie Röhrs<br>Janneke Stein<br>Eli Myriam Tchouadje |
| **Qoraal** | Luisa Gebauer |
| **Sawirka iyo qaabaynta** | Anna Laura Jacobi |
| **Tafatirka** | Angelika Lauriel |
| **Turjumaada** | Dialecta Zentrum für Internationale Sprachdienstleistungen GmbH |


Xuquuqda daabacaadda © Save the Children Deutschland e.V. iyo Plan International Deutschland e.V., Berlin und Hamburg 2023

Samayn buugga sawirka iyo akhriska ah waxaa la fuliyay iyada oo qayb ka ah mashruuca "Si wadajir ah uga qaybqaadashada badan ee carruurta iyo qoysaska qaxootiga ah ee nidaamka daryeelka carruurta iyo dhalinyarada. Marin-u-siin – Dhiiragelinta Wadashqeyn!" oo ay maalgelisay Wasaaradda Federaalka ee Arrimaha Qoyska, Muwaadiniinta Qaangaarka ah, Haweenka iyo Dhalinyerada. Daabacaaddan ma matasho ra'yi dhiibashada Wasaaradda Federaalka ee Arrimaha Qoyska, Muwaadiniinta Qaangaarka ah, Haweenka iyo Dhallinyarada.

Youssef wuxuu la nool yahay hoy qaxoonti waalidkiis, mataanaha ka yar Mo iyo Bo, iyo xubnaha kale ee qoyska. Isagu halkaas kama helo. Qoysku waxa ay wadaagaan qol yar, qofna marna keligiis ma noqdo, inta badan waxaa jira muran, mana jiraan wax carruurta ay ku samayn karaan halkaas. Inta badan, Yuusuf wuu caajisan yahay. Mataanaha sidoo kale ma jecla halkaas, way ooyaan si aan kala joogsi lahayn. Hooyo iyo aabbe ma yaqaaniin sida loo wanaajin karo xaaladda. Isaga oo u maraya saaxiibkiis Aïssatou, Youssef wuxuu bartay adeegyada carruurta iyo dhallinyarada. Wuxuu si dhakhso ah saaxiibo cusub uga samaystay naadiga carruurta, hooyada iyo aabahana waxay ogaadaan sida adeegyada ay bixiyaan hay'adaha adeegyada carruurta iyo dhallinyaradu ay u caawin karaan qoysaska marka ay imanayaan Jarmalka iyo sida ay uga caawin karaan caqabadaha kale.

**Buug ku saabsan adeegyada carruurta iyo dhalinyarada ee loogu talagalay carruurta iyo waalidiinta qaxootiga ah**

Save the Children

PLAN INTERNATIONAL

Gefördert vom:

Bundesministerium für Familie, Senioren, Frauen und Jugend